Latvia

# WAXA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD KA OGAATO ILAALINTA CAALAMIGA AH



SOMALI

**Waxaad hadda ku sugan tahay Latvia, kaasoo ah waddan ka tirsan EU+. Waddamada EU+ waa:**

- 27-ka Dowladdood ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czechia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo
- 4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway iyo Switzerland.

## TUSMADA


Waa maxay ilaalinta caalamiga ah (magangalyada)? 3

Waa maxay habraaca magangalyadu? 4

- Waa halkee goobta iyo goorta ay ka dhici doonto diiwaangelinta iyo gudbinta codsigaagu? 6
- Maxaa dhici doona inta lagu guda jiro diiwaangelinta iyo gudbinta codsiga? 7
- Muxuu noqon doonaa habraacu haddii ay kula socdaan carruur ama qof weyn oo kugu tiirsan? 10
- Waddankee ayaa baadhi doona codsigaaga? 11
- Sidee ayaa codsigaaga loo badhi doonaa? 12
- Sidee ayaad ku heli doontaa go'aanka codsigaaga ilaalinta caalamiga ah? 14

Waa maxay xuquuqahaagu? 15

Waa maxay waajibaadkaagu? 19

Waa maxay cawaaqibka ka dhalan kara haddii aanad kasoo bixin waajibaadkaas? 23

Sidee ayay maamulka u tixgelin doonaan baahiyaha gaarka ah? 25

Baadhista caafimaad 25

Maxaa dhici doona haddii aad rabto inaad ku laabato wadankaaga? 26

# WAA MAXAY ILAALINTA CAALAMIGA AH?

Waxa laga yaabaa inaad u baahato ilaalin caalami ah haddii aadan ku laaban karin wadankaaga sababtoo ah waxaad ka baqaysaa cadaadis ama khatar dhab ah oo dhibaato weyn kugu ah. Tani waxay ka dhigan tahay, tusaale ahaan, in noloshaada ama xorriyaddaada ay khatar ku jirto, isla markaana maamulka wadankaagu aanu kaa ilaalin doonin khatarta aad wajahayso.

Waxaa xaq u leedahay inaad codsato ilaalin caalami ah.

Yurub gudaheeda, ilaalinta caalamiga ah waxay qaadan kartaa dhawr nooc oo kala duwan: **xaalada qaxoontiga** ama **ilaalinta aan buuxin**.

Ilaalinta caalamiga ah waxa sidoo kale loo yaqaanaa magangalyada.



## WAA MAXAY HABRAACA MAGANGALYADU?

Inta lagu jiro habraaca magangalyada, maamulku waxay qiimayn doonaan haddii aad u baahan tahay ilaalin caalami ah, haddii ay sidaas tahayna, nooca ilaalinta ee kugu habboon.


Inta lagu jiro habraaca waxaad fursad u heli doontaa inaad sheegto dhammaan sababaha aad uga tagtay gurigaaga iyo dalka aad asal ahaan kasoo jeedo. Si daacadnimo leh ugu sheeg saraakiisha dhammaan sababaha aad uga soo tagtay dalkaaga.

Markaad weydiisato ilaalin caalami ah, waxaa laguu tixgeliyaa codsade ilaalin caalami ah.



Macluumaad kasta oo aad la wadaagto maamulka waxay ahaan doonaan kuwo sir ah. Macluumaadkan lalama wadaagi doono kuwii aad kasoo carartay.

Habraaca magangalyadu waxa kamid ah tallaabooyinkan soo socda.



## WAA HALKEE GOOBTA IYO GOORTA AY KA DHICI DOONTO DIIWAANGELINTA IYO GUDBINTA CODSIGAAGU?

Markaad maamulka ka codsato ilaalin caalami ah, codsigaaga waxaa lagu diiwaangelin doonaa lana gudbin doonaa isla maalintaas iyo isla goobtaas. Waxa diwaangalin doona oo gudbin doona Ciidanka ilaalinta xuduuda.




Waxaa aad muhiim u ah inaad dhammaystirto gudbinta codsigaaga. Haddii aad ku guuldareysato dhammaystirka gudbinta, codsigaaga waxaa loo tixgelin doonaa mid la laalay, ilaa sababta ku guuldareysiga ay ka baxsan tahay awooddaada. Tani waxay ka dhigan tahay inaad waayi doonto xaaladdaada codsade, xaqa aad u leedahay taageero iyo adeegyo, iyo xaqaaga inaad ku sii joogto dalkaas.

## MAXAA DHICI DOONA INTA LAGU GUDA JIRO DIIWAANGELINTA IYO GUDBINTA CODSIGA?

**Diwaangalinta iyo gudbinta waxa ku jira dhinacyadan soo socda.**



Farahaaga ayaa la qaadi doonaa.



Sawirkaada ayaa la qaadi doonaa.




Waxaa lagu weydiin doonaa inaad soo bandhigto dhammaan dhukumentiyadaada aqoonsiga, safarka, iyo dhukumentiyada kale ee khuseeya.



Waxa lagu weydiin doonaa inaad sheegto faahfaahinta shaqsiga ah. Waxaa sidoo kale lagu weydiin doonaa xubnaha qoyskaaga ka mid ah ee ku nool dalkaas ama dal kale oo EU+ ah.




Waxa lagu weydiin doonaa inaad bixiso faahfaahinta halka lagaala soo xidhiidhayo (cinwaanka, lambarka taleefanka iyo cinwaanka iimaylka).



Adiga iyo alaabtaada waa la idin baadhi karaa. Hantidaada gaarka ah waxay ahaanaysaa mid adiga kuu gaar ah waxaana laguu soo celin doonaa, marka laga reebo hantida loo arko mid khatar ah.



Waxaa laga yaabaa inaad gasho baadhitaan caafimaad.



Waxaa lagu weydiin doonaa inaad soo gudbiso dhammaan macluumaadka iyo dhukumentiyada la heli karo ee taageeraya codsigaaga. Tani waxaa kamid ah macluumaadka iyo dhukumentiyada ku saabsan:

- wadankaaga hooyo iyo waddan kasta oo aad ku soo noolaatay
- sababaha aad uga soo tagtay wadankaaga iyo sababta aanad u rabin inaad u laabato
- asalkaaga iyo asalka qoyskaaga
- faahfaahin ku aadan safarkaaga aad ku tagtay ee ku dhex joogto Yurub
- codsiyadii hore ee ilaalinta caalamiga ah.

Kala horaynta tallaabooyinkan wuu kala duwanaan karaa, laakiin dhammaan codsadayaasha si isku mid ah ayaa loola dhaqmaa. Xogta la ururiyey si ammaan ah ayaa loogu kaydin doonaa xog-ururinta qaranka iyo tan Yurub.

Waxa waajib kugu ah oo danahaagu ku jiraan inaad sheegto runta oo aad la shaqayso maamulka.



Marka aad is diwaangalisay ee aad gudbisay codsigaaga, waxaad heli doontaa dhokumanti rasmi ah kaasoo sheegaya inaad tahay codsade ilaalin caalami ah.

Waa inaad mar walba la socotaa.

## MUXUU NOQON DOONAA HABRAACU HADDII AY KULA SOCDAAN CARRUUR AMA QOF WEYN OO KUGU TIIRSAN?



Haddii ay kula socdaan:

- carruurtaada oo ka yar da'da 18 ama
- carruurta ka yar da'da 18 kuwaasoo aad masuul ka tahay sharci ahaan

waxay u baahan yihiin inay codsadaan ilaalin caalami ah sidoo kale. Carruurtu waxay u baahan yihiin inay kuu raacaan maamulka.

Haddii carruurtu ay yihiin 18 sano jir ama ay ka weyn yihiin, waa inay gudbistaan codsigooda.




Haddii aad masuul ka tahay qof 18 sano jira ama ka weyn oo leh naafonimo ka hor istaagaysa inuu go’aan gaadho, waxaad codsan kartaa ilaalin caalami ah oo aad gudbin kartaa codsiga iyaga oo matalaya.

Qofkaas waa inuu joogaa adiga agtaada inta la gudbinayo codsiga.



## WADDANKEE AYAA BAADHI DOONA CODSIGAAGA?




Waxa laguu dammaanad qaadayaa in dal ka mid ah EU+ uu baadhayo codsigaaga ilaalinta caalamiga ah. Ma dooran kartid wadanka.

Maamulku waxay raaci doonaan habraac lagu go'aaminayo dalka EU+ ee mas'uulka ka noqon doona codsigaaga ilaalinta caalamiga ah. Tan waxaa lagu magacaabaa habraaca go'aaminta masuuliyada.

Si taas loo gaadho, waxaad u baahan doontaa inaad masuuliyiinta u sheegto waxyaabaha soo socda.

- Haddii ay jirto xubin qoyskaaga ka mid ah oo ku sugan waddan kale oo ka tirsan EU+.
- Haddii waddan kale oo ka tirsan EU+ uu hore kuu siiyay fiiso ama dhukumenti deggenaansho. (Fiisahu wuxuu kuu ogolaanayaa inaad booqato wadanka. Tan waxa laguugu dhajin doonaa baasaboorkaaga. Dhukumentiga deganaanshuhu waa dhokumanti kuu ogolaanaya inaad joogto wadanka.)
- Haddii aad hore u gashay waddan kale oo ka tirsan EU+.
- Haddii aad marhore ka codsatay ilaalinta caalamiga ah waddan kale oo EU+ ah.
- Haddii waddan kale oo EU+ ah ku siiyay diblooma aqooneed ama tacliin.

Haddii masuuliyiintu aaminsan yihiin in waddan kale oo ka tirsan EU+ uu mas'uul ka noqon karo baarista codsigaaga, waxaad heli doontaa macluumaad faahfaahsan oo dheeraad ah oo ku saabsan habraacan iyo xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga.

Waxaad raadin kartaa macluumaad dheeraad ah buug-yare ka duwan.

# SIDEE AYAA CODSIGAAGA LOO BADHI DOONAA?

## BAADHIITAANKA U-QALMITAANKA

Xaalado qaar, waxaa jiri doona baadhis hordhac ah oo ku saabsan codsigaaga.

Baadhistan hordhaca ah waxaa loo yaqaan baadhitaanka u-qalmitaanka waxayna qaadan kartaa ilaa 2 bilood.

Tan macnaheedu waxa weeyi maamulku waxay marka hore baadhi shantan su'aalood ee soo socda.

- Miyaad marhore ka codsatay ilaalinta caalamiga ah waddan kale oo EU+ ah?
- Ma hore ayaad uga heshay ilaalin caalami ah waddan aan ka tirsaneyn EU, halkaas oo aad ammaan ku ahaan karto isla markaana aad ku laaban karto?
- Ma laguu oggolaan karaa inaad dib ugu noqoto waddan aad ammaan ku tahay oo codsigaaga ilaalinta caalamiga ah lagu baadhi karo?
- Ma codsatay ilaalin caalami ah in ka badan 7 maalmood kadib markii la soo saaray go’aan ku saabsan soo celintaada?
- Ma maxkamad ama guddi dambiyo caalami ah ayaa kuu fududeeyay in si ammaan ah lagu geeyo waddan kale, mise maxkamad ama guddi dambiyo caalami ah ayaa haatan ku hawlan arrintaas?



Waxa lagugu martiqaadi doonaa si lagaaga waraysto su'aalahan. Tan waxa loo yaqaanaa waraysiga la aqbali karo. Inta lagu jiro waraysigan, waxaa sidoo kale lagaa weydiin karaa sababaha aad ugu codsatay ilaalinta caalamiga ah iyo sababta aadan u doonaynin inaad dalkaaga ugu laabato.

Iyadoo ku xidhan xaaladahaaga marka loo eego su’aalaha kor ku xusan:

- codsigaaga waa la diidi karaa, ama
- Hannaanka ayaa sii socon doona, waxaana maamulku eegi doonaan haddii aad u baahan tahay ilaalinta caalamiga ah.

  Sarakiisha xafiiska Arrimaha jinsiyadda iyo socdaalka Waxa lagugu wargelin doonaa haddii baadhitaanka u-qalmitaanka uu ku khuseeyo, waxaana laguu sharxi doonaa faahfaahin dheeraad ah.

## SIDEE AYAA CODSIGAAGA LOO BADHI DOONAA?

### BAADHISTA CODSIGAAGA

Maamulku waxay eegi doonaan haddii aad u baahan tahay ilaalinta caalamiga ah.



Waxa lagugu martiqaadi doonaa **waraysiga gaarka ah**.

Waxaad heli doontaa martiqaad laguugu soo diraayo boostada,iimaylk, akoonkaaga internetka mise si shaqsi ahaan ah.

Waraysigu wuxuu ku dhici doonaa si fool-ka-fool ah ama, kiisaska gaarka ah, si fogaan arag ah. Dhagaysiga waraysiga waa la duubi doonaa.

Waraysigu waa fursadda aad ku faahfaahin karto sababaha aad ugu codsanayso ilaalinta caalamiga ah iyo sababta aadan u doonaynin inaad dalkaaga hooyo ku laabato.
Waa inaad kasoo qeybgashaa waraysiga gaarka ah oo aad timaadaa wakhtiga loogu talagalay. Haddii aadan ka soo qaybgelin wareysiga gaarka ah adigoon haysan sabab dhab ah oo caddayn wadata, codsigaaga waxaa loo tixgelin doonaa mid la joojiyey, oo kiiskaagana dib ayaa loo eegi doonaa. Haddii aad diido ka jawaabista su'aalaha inta lagu jiro waraysiga adigoon haysan sabab macquul ah, codsigaaga sidoo kale waxaa loo tixgelin doonaa mid la joojiyey.

Codsade kasta oo qaangaadh ah waxa lala yeelan doonaa waraysi gaar ah.

Carruurtaada waxaa la siin doonaa fursad wareysi lagula yeesho.

Kadib waraysiga gaarka ah, codsigaaga waa la qiimayn doonaa. Maamulku waxay go'aamin doonaan haddii aad heli doonto ilaalinta caalamiga ah ama aanad heli doonin.

Xaaladaha gaarka ah, waraysiga gaarka ah dhici doono. Maamulku wuxuu kugu wargalin doonaa haddii tani ay kugu habboon tahay.



**Ilaa intee inleeg ayay qaadan doontaa in codsigaaga la baadho?**

Habraacu wuxuu qaadan doonaa ilaa 6 bilood laga bilaabo maalinta la gudbiyo codsiga. Mararka qaarkood, baadhitaanku wuu dheeraan karaa, laakiin ma aha inuu ka bato 21 bilood.

## SIDEE AYAAD KU HELI DOONTAA GO’AANKA CODSIGAAGA ILAALINTA CAALAMIGA AH?



Go'aan qoraal ah baa laguugu soo diri doonaa boosta/laguugu soo diri doonaa si elaktaroonig ah/si toosaa laguugu keeni adiga ama lataliyahaaga sharci, haddii aad leedahay. Waxaa lagugu soo wargelin doonaa natiijada go’aan luuqad aad fahmi karto.

Haddii go’aanku noqdo mid diidmo ah, sababaha waxaa lagu sharxi doonaa go’aanka, waxaana laguu soo saari doonaa go’aan ku saabsan inaad dalkaga ku laabato.

### SUURTOGALNIMADA RACFAANKA



Haddii aanad ku qanacsanayn go'aanka waxaad qaadan kartaa racfaan. Taas macnaheedu waxa weeyi maxkamad ayaa dib u eegi doonta go'aanka. Waxaad codsan kartaa lataliye sharci oo bilaash ah si uu kaaga caawiyo racfaanka.

Waxaad u baahan tahay inaad soo gudbiso racfaankaaga inta lagu jiro wakhtiga cayiman ee lagu sheegay go’aanka. Waxaad heli doontaa macluumaad faahfaahsan oo dheeraad ah haddii aad hesho go’aan diidmo ah.

Haddii codsigaaga ilaalinta caalamiga ah iyo racfaanka la diido, oo aadan xaq u lahayn inaad sii joogto sababo kale awgood, waa inaad ka baxdaa Jamuhuuriyadda Latvia taariikhda lagu sheegay. Haddii aanad si iskaa ah u bixin, si qasab ah ayaa lagugu celin doonaa.

# WAA MAXAY XUQUUQAHAAGU?

## WAXAAD XAQ U LEEDAHAY INAAD JOOGTO OO AAD HESHO ADEEGYADA TAAGEERADA IYO ADEEGYADA



Ka codsade ilaalinta caalamiga ahaan, sharciyan waxaad xaq u leedahay inaad ku sii nagaato dalka masuulka ka ah baadhitaanka codsigaaga ilaa baadhitaanku dhamaado.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan taageerada soo-dhawaynta iyo adeegyada aad heli doonto buug-yaraha gooni ah.



## WAXAAD XAQ U LEEDAHAY INAAD HESHO TURJUMAAD



Haddii aanad hadli karin luuqada Latvianka, Turjumaan ayaa kaa caawin doona inaad la xidhiidho maamulka inta lagu jiro diiwaangelinta iyo soo gudbinta codsigaaga iyo sidoo kale inta lagu jiro wareysigaaga gaarka ah. Turjumaanku waa bilaash.

Turjumaanku waa dhexdhexaad, micnaha cidna uma xaglinayo. Waxay ixtiraamaan sirta, mana la wadaagi doonaan wax kasta oo aad tidhaahdo cid ka baxsan maamulka awoodda leh.

Turjumaanku wax saamayn ah kuma laha go'aanka codsigaaga.

Si degdeg ah u wargeli maamulka haddii aadan fahmin turjumaanka ama aad u malaynayso in turjumaanku aanu dhexdhexaad ahayn.

## WAXAAD CODSAN KARTAA TURJUMAAN IYO WARAYSTE LAB AMA DHEDIG AH MARKAAD GALAYSO WARAYSIYADA GAARKA AH, HADDII TANI AY KAA CAAWINAYSO INAAD SI BUUXDA U SHARAXDO NAFTAADA WAXYAABAHA KU SAABSAN



Iyadoo ku xidhan sababahaaga iyo haddii ay jirto fursad, codsigaaga waa la fulin doonaa.

## WAXAAD LA TASHAN KARTAA LATALIYE SHARCI (QAREEN)



Lataliye sharci waa shaqsi ku siinay kaalmo sharci oo gaar ah ama ku matalaya adiga si uu ula macaamilo maamulka. Lataliyaha sharci wuu ka madaxbanaan yahay maamulka oo wuxuu difaacayaa danahaaga. Lataliyaha sharci wuxuu kaa caawin karaa codsigaaga ilaalinta caalamiga ah, habka magangalyada, wada xidhiidhista rasmiga ah, waxaana uu kula joogi karaa inta lagu jiro wareysigaaga gaarka ah.

Waxaad xaq u leedahay inaad la tashato lataliye sharci marxalad kasta oo ka mid ah habka magangalyada adiga oo kharashka iska bixinaya..

Lataliyaha sharcigu waxa lagugu siin doonaa lacag la'aan inta lagu jiro baaritanka codsigaaga hadii aad codsato mid.

La wadaag faahfaahinta lataliyahaaga sharci maamulka markaa waxay kala socon karaan waxyaabaha ku saabsan codsigaaga.

## WAXAAD XAQ U LEEDAHAY IN LAGU OGEYSIIYO OO AAD CODSATO LATALIN SHARCI OO BILAASH AH



Waxaad codsan kartaa latalin sharci oo bilaash ah inta lagu jiro habraaca magangalyada. Tan waxa kujirta latalin sharci oo kaa caawisa gudbinta codsigaaga.

Latalin sharci micnaheedu waxa weeyi waxaad heli kartaa sharaxaado ku saabsan:

- xuquuqahaaga iyo waajibaadkaaga
- habraacyada kala duwan
- arrimaha sharci.

## WAAD LA XIDHIIDHI KARTAA HAY’ADDA QARAMADA MIDOOBAY EE QAXOOTIGA (UNHCR) AMA HAY’ADO KALE




Waxaad ogeysiin kartaa oo la xidhiidhi kartaa UNHCR ama hay’adaha la shaqeeya tallaabo kasta oo ka mid ah habraaca magangalyada.

UNHCR waxay ilaalisaa danaha iyo xuquuqda dadka codsanaya magangalyada iyo qaxootiga. UNHCR ama hay’adaha la shaqeeya sidoo kale waxay bixiyaan macluumaad iyo caawimaad loogu talagalay dadka codsanaya magangalyada.

Faahfaahinta halka lagala xidhiidhayo UNHCR iyo macluumaadka ku saabsan habraaca magangalyada waxa laga heli karaa wabsaytka UNHCR. https://help.unhcr.org/.

[

Waxaad sidoo kale la xidhiidhi kartaa hay’ad kasta oo bixisa talo sharci ama latalin kale oo loogu talagalay codsadayaasha.

# WAA MAXAY WAAJIBAADKAAGU?

### RAAC SHARCIYADA wadankaN



### JOOG wadanka AAD KA CODSATAY ILAALINTA CAALAMIGA AH




Ha isku dayin inaad u safarto dal kale oo EU+ ah. Waxaa laguu oggol yahay kaliya inaad u safarto dal kale oo EU+ ah haddii maamulku kuu oggolaadaan.

### HUBI IN MAAMULKU KU HELI KARAAN IYO INAAD ILAALISO WAKHTIYADA BALLAMAHA




Waa inaad timaadaa dhammaan ballamaha gaarka ah markasta oo ay kaa codsadan maamulku. Waa inaad halkaa timaadaa wakhtiga loogu talagalay. Haddii aadan ka soo qayb geli karin ballan sabab macquul ah awgeed, si degdeg ah u wargeli maamulka oo sharax sababta.



## SI DHAMMAYSTIRAN ULA SHAQEEE MAAMULKA

Marka lagaa codsado, waa inaad samaysaa kuwan soo socda.

- Bixi faahfaahintaada shaqsiga ah.




- Bixi dhukumentiyada aqoonsiga. Haddii aanad haysan, sharax sababta.



- Haddii faraha iyo sawiro lagaa qaaday.



- Gudbi codsigaaga wakhtiga iyo goobta loogu talagalay.
- Kaalay waraysiga gaarka ah oo ka jawaab su'aalaha inta lagu jiro waraysiga.



- Ogolow in lagu baadho adiga iyo alaabahaaga la baadho, haddi maamulku codsado inay sidaa sameeyaan. Baadhitaan waxa la samayn doonaa kaliya marka loo baahdo oo ay caddayn u jirto. Maamulu waxay kuu sharixi doonaan sababaha codsiga loo samaynayo. Baadhitaanka waxa fulin doona shaqsi kula jinsi ah waxaana loo samayn doona nidaam sharaftaada la ixtiraamayo.

## SHEEG RUNTA



Waxaad sheegtaa waxa uu aad muhiim ugu yahay sumcada codsigaaga. Taasi waa sababta ay muhiim u tahay inaad daacad noqoto oo aad bixiso macluumaad buuxa oo sax ah oo ku saabsan aqoonsigaaga, qoyskaaga, dalkaaga hooyo, sababaha aad uga tagtay dalkaaga, iyo sababta aadan u doonaynin inaad halkaas ku laabato.

Waxaa dhici karta inaadan xasuusan wax walba, sidaa darteedna waxaa dhici karta inaadan ka jawaabi karin dhammaan su'aalaha. Haddii sidaasi dhacdo, ha samaynin jawaabaha laakiin sharax inaanad xasuusan.

## BIXI FAAHFAAHINTA SAXDA AH EE HALKA LAGAALA SOO XIDHIIDHAYO EE LAGAA HELI KARO




Maamulku waa inay awoodaan inay ku helaan marka laga hadlayo codsigaaga ilaalinta caalamiga ah.

Haddii cinwaankaaga, iimaylka ama taleefanka aad baddesho, wargali maamulka isla markiiba.

**Xasuusnow, waa inaanad ka tagin Latvia inta codsigaaga la baadhayo**

Haddii lagu dejiyay xarun hoy, waa inaadan meel kale u guurin adigoon fasax ka haysan maamulka.

## SOO GUDBI DHAMMAAN MACLUUMAADKA IYO DHUKUMENTIYADA TAAGEERAYADA CODSIGAAGA CIIDANKA ILAALADA XUDUUDA QARANKA AMA XAFIISKA ARRIMAHA JINSIYADDA IYO SOCDAALKA

Haddii aad haysato dhokumantiyo aqoonsi, waa inaad soo bandhigtaa sida ugu dhakhsaha badan.

Waa inaad gudbisaa macluumaad kasta iyo dhukumenti kale oo caawin kara maamulka si ay u baadhaan codsigaaga ama u go'aamiyaan wadanka masuulka ka ah baadhitaanka codsigaaga. Dhukumentiyadani waxay noqon karaan, tusaale ahaan, baasaboorka, shahaadada guurka, buugga qoyska, kaadhrka aqoonsiga milatariga, caddeynta shaqada, kaadhka xubinimada xisbi siyaasadeed, shahaadooyin, warbixino maxkamadeed iyo booliis, sawirro iyo dhukumenti caafimaad ama kuwo maanka ah.

Uma baahnid inaad soo gudbiso dhukumantiyo kaliya ka kooban macluumaad guud oo ku saabsan dalkaga. Maamulka magangalyadu waxay ka warqabaan xaalada wadankaaga.




Waa inaad soo gudbisaa dhammaan macluumaadka iyo dhukumentiyada sida ugu dhakhsaha badan markaad dirayso codsigaaga. Haddii aadan haynin dukumentiyada si degdeg ah, waa inaad soo gudbisaa marka aad hesho, ilaa iyo inta go'aan laga gaarayo codsigaaga, adigoo ugu diraya boosto ama iimayl ahaan Xafiiska Arrimaha Jinsiyadda iyo Socdaalka.

Waa waajib inaad soo bandhigto dhokumantiyo asal ah, intii suurogal ah. Waa inaanad tuurin ama meesha ka saarin dhukumentiyada aqoonsiga. Waa inaadan qarin wax dhukumenti ah oo khuseeya. Waa inaanad waligaa soo gudbin dhokumanti been abuur ah.

Haddii ay suurtagal tahay, oo inta aysan khatar dhicin, weydii asxaabtaada ama qaraabadaada inay kuu soo diraan dhukumentiyadaada.

# WAA MAXAY CAWAAQIBKA KA DHALAN KARA HADDII AANAD KASOO BIXIN WAAJIBAADKAAS?

## HABRAACAAGA MAGANGALYO WAA LA JOOJIN DOONAA






Codsigaaga waxa loo tixgelin doonaa **mid la joojiyay ama la diiday**. Tani waxay ka dhigan tahay inaad waayi karto xaaladdaada codsade ilaalinta caalamiga ah iyo dhammaan xuquuqaha la xidhiidha.

Tani waxay dhacaysaa haddii aad diido:

- inaad bixiso macluumaad marka lagaa codsado
- in faraha iyo sawiro lagaa qaado
- inaad bixiso cinwaankaaga
- ka jawaab su'aalaha inta lagu jiro waraysigaaga gaarka ah.

Waxa sidoo kale dhici doona haddii:

- aanad gudbin codsigaaga wakhtiga loogu talagalay iyadoo aanu jirin sabab macquul ah
- aadan ka soo qayb galin wareysiga shaqsiyeed adoon haysan sabab dhab ah.
- aadan u soo wargelin maamulka marka lagaa codsado inaad sidaas sameyso.
- aadan ku sii nagaan goobta lagugu waajibiyay inaad joogto
- aysan kula soo xidhiidhi karin maamulka
- aad ka baxdo wadanka.

Waxaad sidoo kale go’aansan kartaa inaad ka noqoto codsigaaga wakhti kasta inta lagu jiro habka magangalyada, tusaale ahaan, sababtoo ah waxaad go’aansatay inaad dalkaga ku laabato. Kiiskan oo kale, waxaad waayi doontaa xaaladdaada codsade ilaalinta caalamiga ah.

## NOOCYADA TAAGEERADA SOO-DHAWAYNTA OO ADEEGYADA WAA LA DHIMI KARAA AMA LA JOOJIN KARAA



Xaaladaha qaarkood, maamulku waxay go'aamin karaan in la yareeyo ama la joojiyo nooc kamid ah taageerada ama adeegyada qaar. Maamulka ayaa kugu wargalin doona go'aanada noocaas ah hab qoraal ah kadib markay qiimeeyaan xaaladaada.

Waxaad raadin kartaa macluumaad dheeraad ah buug-yare ka duwan.

## CODSIGAAGA WAXA LAGA YAABA IN SI XUN LOO SAAMEEYO

Haddii aad bixiso macluumaad marin-habaab ah ama been ah oo ku saabsan aqoonsigaaga ama codsigaaga, ama haddii aad baabi’iso ama aad been-abuurto dhukumanti, tani waxay saameyn xun ku yeelan kartaa codsigaaga, tusaale sida soo socota.



- Codsigaaga waa la diidi karaa oo waxa laga yaabaa inaanad helin ilaalin caalami ah.
- Codsigaaga waxaa lagu baadhi karaa habraaca magangelyada ee xuduudka. (Haddii taasi dhacdo, waxaad heli doontaa macluumaad gaar ah oo ku saabsan habraacaas.)
- Codsigaaga waa la dardargalin karaa. Xaaladdan, waqtiga lagu baadhi doono codsigaaga waxaa lagu soo gaabin doonaa saddex bilood. Habraaca la dardargaliyay waxa sidoo kale uu ku habboonaan karaa sababo gaar ah. Maamulku wuxuu kugu wargalin doonaa oo ku siin doonaa sharaxaad dheeraad ah haddii habraaca dardargalintu uu kugu habboon yahay.

Ilaalinta caalamiga ah sidoo kale lagaa qaadi karaa haddii maamulku ogaadaan goor dambe inaad runta ka been sheegtay inta lagu jiray habka magangalyada.

## SIDEE AYAY MAAMULKA U TIXGELIN DOONAAN BAAHIYAHA GAARKA AH?




Waa inaad maamulka si degdeg ah u wargelisaa haddii aad u baahan tahay taageero gaar ah. Baahiyadani waxay ka dhalan karaan xaalado kala duwan sida uurka, cudurka, ama waayo-aragnimooyinka dhibaatooyinka nafsi, jidheed ama galmo.

Maamulku waxay qiimayn doonaan xaaladdaada, waxayna bixiin karaan taageero dheeraad ah si loo fududeeyo ka qaybgalkaaga habka magangalyada. Tusaale ahaan, waxay shaqaale takhasus leh u qoondeyn karaan kiiskaaga ama waxay wax ka beddeli karaan muddada habraaca magangalyada.

## BAADHISTA CAAFIMAAD



Maamulku waxay kuu sheegi karaan inaad marto baadhitaan caafimaad oo ku saabsan calaamadaha dhibaatooyin hore ama dhaawac culus. Baadhistu waa bilaash oo waxa lagu weydiin doonaa uun ogolaanshahaaga. Waxaa lagugu wargelin doonaa natiijooyinka baadhitaanka, kuwaasoo lagu tixgelin doono qiimaynta codsigaaga Haddii maamulu aanu codsan baadhitaan, adiguna waxaad codsan kartaa baadhitaanka adiga oo kharashka iska bixiya.

## MAXAA DHICI DOONA HADDII AAD RABTO INAAD KU LAABATO wadankaAGA?

Wakhti kasta inta lagu jiro habraaca magangalyada, waxaad go'aansan kartaa inaad si iskaa ah ugu laabato:

- wadankaaga ama
- wadanka aad soo dhaaftay ama waddan kale oo saddexaad, haddii aad xaq u leedahay inaad aado.

Haddii aad go'aansato inaad si iskaa ah ugu laabato, habka magangalyadaada waa la joojin doonaa oo waa mana yeelan doontid xaqa aad ku joogto Latvia.

Haddii aad doonayso inaad si iskaa ah u laabato, fadlan la xidhiidh Ciidanka Ilaalada Xuduudaha Qaranka ama Xafiiska Arrimaha Jinsiyadda iyo Socdaalka. Ciidanka Ilaalada Xuduudaha Qaranka: pasts@rs.gov.lv. Xafiiska Arrimaha Jinsiyadda iyo Socdaalka: pasts@pmlp.gov.lv. Waxaad heli kartaa latalin iyo sidoo kale caawimaad ku saabsan soo noqoshadaada ammaan iyo sharci.



## XAQIIJINTA HELITAANKA MACLUUMAADKA

Sarkaal ayaa ku weydiin doona inaad xaqiijiso helitaanka macluumaadkan.

Haddii aadan wax fahmin ama haddii aad su'aalo dheeraad ah qabto,
mar walba waad waydiin kartaa.

Buug-yarahaan waxa loogu talagalay keliya ujeeddooyin macluumaad ah. Isagu ma abuuro xuquuq iyo waajibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalkan, waxaana EUAA oo keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, taas oo loogu talagalay dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas'uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas'uul ah. EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas'uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025

Publications Office
of the European Union

ISBN 000-00-00-00000-0
doi: 00.0000/0000000
AA-00-00-000-SO-C